## Wax kasta si caddaalad ah ayaa loo samayn karaa

Waxaan rabnaa bulsho, dadka oo dhan daacad u ah. Cadaaladdu waa xaqnimada iyo in go'aannada siyaasadeed aanay keenin in qofka culeyskiisu uu si xad-dhaaf ah u kordho. Waxaan u aragnaa in caddaaladdu tahay, in mas'uuliyadda si simman loo wadaago oo uu aasaaska dowladnimada wanaagsan sii ahaado mid xooggan.

Waxaan doonaynaa Finland oo ay dadku ka baxaan faylka degdegna u helaan daryeelka. Waxaan doonaynaa in aan Finland oo dhan ka hirgelino dammaanadqaadka daryeelka ee labada todobaad iyo in aan u wareegno hannaanka dhakhtarkaaga-daryeelahagaa oo si dhab ah u shaqaynaya.

Waxaa innaga muhiim inoo ah, in natiijooyinka waxbarashada ee carruurta iyo dhallinyaradu kor u kacdo. Waxaan doonaynaa, in dugsiyadu ay noqdaan kuwa ammaan ah iyo bey'ado fiican oo ay carruurta iyo dhallinyaradu wax ku bartaa macallimiintuna wax ku baraan. Hadafkeennu waa in aan yarayno baaxadda kooxaha fasallada, si macallimiintu ay wakhti badan ugu helaan ardayda.

Ma doonnayno in aan kalkaaliyayaasha caafimaadka, macallimiinta, booliska, iibiyayaasha, adeegayaasha makhaayadaha iyo shaqaalaha kale ee badan gelinno mushaar yaraan joogto ah. Waxaan doonaynaa, in nolosha loo hirgeliyo iyadoo wadajir looga heshiinayo loona dhisayo, maya iyadoo la kala goynayo lana murmayo.

Marka siyaasaddu waa mid ku dhisan qiyam doorasho. Xukuumadda midigta u janjeerta waxay Finland geynaysaa jiho khaldan. Sidaas darteed, waa in degmooyinka iyo soonayaasha nololwanaagga lagu gaaraa go'aanno lagu wanaajinayo nololmaalmeedka qof kasta oo naga mid ah.

Waxaan doonaynaa in aan soo celinno kalsoonidii dadka ee ahayd, in bulsho caddaalad ah ay suuragal tahay, iyo in aan qofna culeyskiisu noqon mid xad-dhaaf ah. Wax kasta waxaa laga dhigi karaa caddaalad, wixii caddaalad ah ayaa sidoo kale ah mid caqligal ah. Tan waxaa looga hadlayaa doorashooyinka degmooyinka iyo gobollada.

## Waxaa la dedejinayaa helitaanka daryeelka

Waxaan u aragnaa, in ay tahay in qof kasta ku kalsoonaan karo, in uu helayo daryeel marka uu u baahdo oo wakhti hore ah, taas oo aan ku xirnayn dhaqaalaha qof.

Waa in daryeelka aasaasiga ah ee caafimaadka iyo kahortagga jirrooyinka xoogga loo saaro in ka badan sida hadda loo saaro, si aan u awoodno kahortagga in jirrooyinku sii xummaaday iyo yaraynta baahida adeegyada qaaliga ah. Waxaan ku fara-adaygaynaa helitaanka daryeelka ee labada todobaad ah marka lagu jiro daryeelka caafimaadka ee aan degdegga ahayn ee daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee dhinac walba oo dalka ah. Daryeelka caafimaadka ee afka waa in lagu helaa muddo saddex bilood ah.

Waa in daryeelka caafimaadka aasaasiga ah lagu isticmaalo hannaanka dhakhtarka iyo daryeelaha qofka u gaarka ah. Tani waxay wanaajinaysaa adeegga iyo qanacsanaanta macaamiisha waxayna sidoo kale yaraynaysaa kharashaadka.

Waa in sidoo kale degdeg lagu helaa daryeelka dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka. Adeegyada marxaladda hore ee caafimaadka dhimirka ee dijitaalka ah waa in ay noqdaan kuwa la helayo qof kastana ay si fudud ku heli karto. Waa in la wanaajiyaa garashada dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka marka lagu jiro daryeelka kale.

Waa in helitaanka adeegyada lagu wanaajiyaa dhammaan soonayaasha nololwanaagga iyadoo la isticmaalayo adeegyada dijitaalka ah, qaabilaadda khadka lagu sameeyo, adeegyada guurguura iyo wakhti ballansashada elegtroonigga ah. Ka sokow kuwaan, waa in la sugaa booqashooyinkii soo jireenka ah iyo xiriirka khadka telefoonka.

## Kor ayaa loo kicinayaa natiijooyinka waxbarashada ee carruurta iyo dhallinyarada

Cunug kasta waa in dugsiga xaafaddiisa loogu sugaa waxbarasho aasaasi ah oo tayo leh, caawimaadda waxbarashada iyo agabka waxbarashada ee uu u baahanyahay. Xannaanooyinka iyo dugsiyada waa in ay joogaan dad waaweyn oo ku filan, ammaan ah islamarkaana aqoon leh. Waa waxbarashada xirfadda marka lagu jiro lagu dadaalaa tirada waxbarashada dugsiga lagu qaato.

Waxbarasho-horaadka labada sano ah waxay xoojinaysaa u diyaar noqoshada carruurta ee dugsiga waxayna caawinaysaa xaqiijinta, in carruurta oo dhan ay heystaan fursado isku mid ah oo ay wax ku baranayaan. Cunug kasta waa in uu leeyahay aqoon luqadeed oo ku filan marka uu dugsiga billaabayo. Sidaas darteed, waa in la cusboonaysiiyaa lana kordhiyaa waxbarashada finnishka ama iswiidhishka ee sidii luqad labaad ah (S2).

Waa in dugsiyada loo sugaa degganaan waxbarasho iyadoo la xadaynayo isticmaalka telefoonnada ee qashqashaadda ah marka lagu jiro xiisadaha, iyadoo la xoojinayo xornimada barbaarinta ee ay macallimiintu ku gp'aamin karaan hababka waxbarashada ee ku habboon iyo tirada kooxaha oo la yareeyo. Hadafkeennu waa in tirada kooxuhu noqdaan ugu badnaan 20 arday marka lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah, gaar ahaan fasal-sannadeedyada hoose.

Shaqaalaha dugsiyada iyo machadyada waxbarashada waa in ay heystaan habab ku filan oo ay uga hortagayaan qashqashaadda awoodda ay wax uga qabanayaanna waa in la kordhiyaa.

Waa in la xoojiyaa mas'uuliyadda waalidku uga qaybqaadanayaan wadashaqeynta u dhexeysa dugsiga iyo guriga. Waa in waalidka laga caawiyo wadashaqeynta u dhexeysa dugsiga iyo guriga.

Waa gudaha degmooyinka iyo soonayaasha nololwanaagga si adag wax looga qabtaa dareen xumada carruurta iyo dhallinyarada ee sii kordhaysa iyo dhibaatooyinka wax awoodis la'aanta ee heysata. Waa in dugsiyada laga billaaba isticmaalka hababka ugu wanaagsan ee lagu taageerayo nololwanaagga carruurta iyo dhallinyarada sida dhinaca jaango'naanta maaalinta.

Waxqabadka subaxdii iyo galabtii waa in dib u habayn lagu sameeyo lagana dhigo qayb kamid ah maalin-dugsiyeedka.

Waa in dugsiyadu xoogga lagu saaro qorista shaqaalaha kaydka ee joogtada ah. Waa in iyadoo la kaashanayo nidaam hawleedyada dugsiga iyo machadka waxbarashada u gaarka ah la yareeyo dhibista waana in la wanaajiyo aqoontada dareenka iyo isdhexgalka carruurta iyo dhallinyarada.

Waa in la horumariyaa shaqada dhallinyarada ee lagu qabto dugsiyada iyo machadyada waxbarashada dhexdooda, helitaanka adeegyada ee carruurta iyo dhallinyaradana waa in la wanaajiyo.

Barbaarin-horaadka iyo waxbarashada taageeraya korista iyo waxbarashadu waa in ay noqdaan kuwa dadka oo dhan ay heli karaan. Dugsiga xaafadda waa in la isugu geeyo adeegyada iyo hiwaayadaha kale carruurta iyo dhallinyarada. Waxaan taageeridda hiwaayadda uga hortagaynaa takoormidda, kalinimadana waa ku yaraynaa.

Waa degmooyinka dhexdooda lagu xaqiijiyo in waxbarashada heerka labaad ay sii ahaato mid dhab ahaantii lacag la'aan ah, si uu da'yar kasta u helo fursad uu ku dhammeeyo waxbarashada heerka labaad.

Mabaa'diida hagaya siyaasadda qoysku waa in ay noqdaan adeegyo kahortag ah, lacag la'aan ah si fududna lagu heli karo. Ururadu waxay adeeg-bixiye iyo khuburo ahaanna ku leeyihiin door muhiim ah adeegyada sida fudud lagu helo ee la siinayo qoysaska. Badbaadada carruurtu waa in ay u wareegtaa waxqabadka kahortagga ah ee dhanka qoyska u janjeera.

Dareen xumida carruurta iyo dhallinyarada waxay u muuqan kartaa qaab rabshad ah. Waxaa taas wax looga qabanayaa wadashaqeynta qaybaha badan ee xooggan, taas oo sidoo kale laga qaybgelinayo walidka ilmaha ama da'yarka.

Degmo kasta waa in lagu sameeyaa istaraatjiyadda bixinta caawimadda ka billaabanaysa barbaarin-horaadka gaaraysana waxbarashada heerka labaad, taas oo lagu go'aaminayo nooc uu yahay caawimaadda la siinayo iyo noocyada ilo-awoodeed ee lagu siinayo.

## Waxaa dadka da'da ah loo sugayaa adeegyo shaqaynaya

Dadka da'da ah waa in loo dammaanadqaado waayeelnimo ammaan iyadoo la kaashanayo adeegyo shaqaynaya. Waa in aan ku dadaalno, in dadka da'da ah la siiyo adeegyo baahiyahooda daboolaya ama goob daryeel, marka ay u baahdaan. Waa in xoogga la saaro baxnaanada dadka waaweelka ah, wadajir ahaan u degganaaanshaha iyo adeegyada guryaha loogu geynayo ee sugaya awooddooda waxqabadka.

Waxaan u aragnaa, in aan laga gorgortamin tirada shaqaalaha loogu talaggalay daryeelka dadka waayeelka ah, si aanay u wiiqmid tayada qofka la daryeelayo culeyska shaqaaluhuna u kordhin.

Waa in la is waafajiyaa shuruudaha ehel-daryeelista ee dalka oo dhan, adeegyada caawimaaddu waa in la helo laguna dadaalo tirada caawimaadda lagu bixiyo ehel-daryeelista. Waa in la awoodaa in sidan si ka fiican loo caawiyo shaqaalaha daryeela waalidkooda

waayeelka ah, si ay uga soo baxaan awood ahaan xaalad nololeedka culeyska ah ee nolosha shaqada.

## Waarista iyo kocoba dhaqaaluhu waa suurtageliyaha adeegyo aasaasi ah oo xooggan

Si loo sugu adeegyada aasaasiga ah, waa in degmooyinka xoogga lagu saaro waxqabayada xoojinaya koboca iyo shaqaaloobidda. Waa in la dheereeyo wakhtiga waajibka bixinta isdhinka dhaqaalaha ee soonayaasha nololwanaagga, si ay soonayaasha nololwanaaggu u helaan fursad ay ku horumariyaan waxqabadka iyadoo aanay jirin yaraynta lacagaha aragtida gaaban ee halis gelinaysa adeegyada.

Waxaan rabnaa in aan xaqiijinno, in hawsha la xiriirta maalgelinnada iyo iibka lagu bixinayo lacagta canshuurta dadweynaha loogu hoggaansamo markasta sharciga Finland, xeerarka sharciga shaqada iyo heshiisyada shuruudaha shaqada. Waxaa kuwaan lagu sugayaa kaalinta shaqaalaha, waxaa lagu xoojinayaa shaqaaloobidda iyo awoodda tartan ee shirkadaha Finnishka h iyo kahortagga ka ganacsiga dadka.

### Degmooyinka dhaqan ee noloshu ka jirto

Degmooyinku waa in ay xoogga saaraan si hufan u shaqaynta adeegyada shaqaaloobidda iyo abuurista nidaam hawleedo cusub oo saamayn leh. Sidoo kale, waa in adeegyada la soo iibsanayo ee adeegyada shaqaaloobidda xoogga lagu saaro saamayn yeelashada adeegga.

Adeegyada shaqaaloobidda iyo quud soo saarashada waa in lagu bixiyo mabda'd ku salaysan hal xiriir waana in ay ka jawaabaan baahiyaha shaqaalaha, shirkadaha iyo shaqo bixiyayaasha soonaga. Adeegyada shaqaaloobiddu waa in ay taageeraan degdeg u shaqaaloobidda iyo baahiyaha gaarka ah ee dadka. Hadafkeennu waa, in qof kasta uu shaqo ku helo si awooddiisa waafaqsan.

Adeegyada shaqada iyo meheradu waa in ay shirkadaha ka taageeraan arrimaha la xiriira shaqaalaysiinta iyo in ay ka caawiyaan iyaga shaqaalaysiinta dadka ku jira kaalinta liidata uga jira suuqa shaqada. Waa in ganacsadaha cusub la siiyaa tababar ama hagitaan ugu yaraan labada sano ee ugu horreysa.

La qabasiintu waxay door muhiim ku leedahay shaqaaloobidda. Waa in degmooyinka lagu horumariyo adeegyada dadka shaqo darteed dalka ugu soo guuraya iyo laqabsashada, waa in sidoo kale la kordhiyo saamayn leeyashada adeegyada marxaladda hore ee laqabsashada iyo in sidoo kale la xaqiijiyo, in adeegyada kale ay taagerayaan degista iyo laqabsashada Finland.

Waa in degmooyinka xoogga lagu saaro barashada degdegga ah ee finnishka ama iswiidhishka, billaabista waxbarashada iyo shaqaaloobidda ee dadka dalka u soo guuray. Adeegyada dadka shaqo darteed dalka ugu soo guuray waa in hal meel la isgu keeno iyadoo laga shaqaynayo saraakiisha kale. Waa in si degdeg ah wax looga qabtaa waxbaayaha xaqabadda ku ah shaqaaloobidda, sida takoorka lala kulmo marka shaqada la raadinayo.

Waa in degmooyinka si gaar ah loogu horumariyo laqabsashada dalka ee hooyooyinka dalka u soo guuray, taas oo xoojinaysaa nololwanaagga qoysaska iyo fursadaha uu cunuggu isugu filnaan karo bulshada ula qabsan karo.

Waa in degmooyinka lagu sameeyo aasaas xooggan oo ganacsiga loogu talaggalay iyo in la sameeyo wadashaqeyn dhow oo dhexmarta shirkaha, machadyada waxbarashada iyo dadka go'aanka gaara. Waa in sidoo kale degmooyinka lagu xaqiijiyo, in shirkadaha yaryar ay heystaan fursado ay horumar ku sameeyaan marka lagu jiro tartannada qandaraasyada. Tani waxay imaanaysaa tusaale ahaan iyadoo macquul laga dhigo shuruudaha tartannada.

Degmooyinku waa in ay si gaar ah u horumariyaan hirgelinta maalgelinnada ilo dhaqaaleedyada aan gurin. Waa in gacanta lagu hayo kaabayaasha muhiimka ah, sida wakaaladda biyaha. Degmooyinku waa in tusaale u noqdaan dhaqaalaha ku dhisan dib u isticmaalidda marka wax la soo iibsanaya waa in la horumariyaa horumarka waara.

### Soonayaasha nololwanaagga ee wax ku oolka ah

Soonayaasha nololwanaaggu waa sidii hore si ka fiican arrimaha u maareeyaan , si aan u sugno adeegyada muhiimka ah halkii aan ka baabi'in lahayn.

Waa in sida hadda si ka xooggan loo isticmaalo nidaamyada loo arko in ay dan ugu jirto soonayaasha nololwanaagga.  Waa suuraggal in sida hadda si ka badan looga faa'iidaysto garaadka sanaaciga ah maarka lagu jiro samaynta cudur aqoonsashada iyo qoritaannada otomaatigga ah ee warbixinta bukaanka. Waa in dib u habayn lagu sameeyo si buuxdana loo xoojiyo boroseeska daryeelka. Waa in la yareeyo qaabilaadaha koontaroolka caafimaadka, marka aan iyaga laga heleyn faa'iido muuqata.

Waa in kireysashada shaqaalaha ku meelgaarka ah loo isticmaalo nidaam dhigaya qiimaha ugu badan marka ay ka shaqaynayaan daryeelka caafimaadka dadweynaha. Waa in sida hadda ah si ka xooggan wax looga qabtaa sida xad dhaafka ah ee adeegga la isugu geynayo adeegyada caafimaadka ee gaarka loo leeyahay iyo sare u kaca qiimaha ee arrintaas ka dhashay. Waa in la adkayaa nidaamyada waxqabadka tartanka ku dhisan ee ka dhexjira laamaha adeegga guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Waa in la horumariyaa waxqabadka cilmibaarista, horumarka iyo hindisaha cusub ee soonayaasha nololwanaagga waana in sidoo kale meelgelinta la siiyo cilmibaarista aasaasiga ah.

Waa in soo celinta kharashka safarka gebi ahaanba laga wareejiyo Kelada loona wareejiyo soonayaasha nololwanaagga.

## Waxaa xoogga la saarayaa nololwanaagga shaqaalaha adeegyada aasaaska u ah

Hoggaaminta wanaagsan waxay wanaajisaa awoodda waxqabadka iyo nololwanaagga shaqaalaha iyo weliba xiisaha loo hago goobaha shaqada.  Waxaan qawlqaadnay hiigsashada yaraynt muuqata oo maqnaanshiyaha jirradu sababtay ee ka dhaca degmooyinka iyo soonayaasha nololwanaagga.

Waa in shaqaalaha lagu dhiirrigeliyo samaynta shaqada hufan iyo hagaajinta wax saarka, si natiijada fiican ay sidoo kale uga muuqato mushaaraadka shaqaalah. Waxaa shaqaalaha laga abaalmarin karaa tusaale sanduuqa dhaqaalaha shaqaalaha.

Degmo kasta iyo soone nololwanaag kasta oo Finland ku yaal waa in lagu hagaajiyo fursadaha ay shaqaaluhu uga qaybqaadan kartaa diyaarinta iyo go'aan ka gaarista arrimaha quseeya shaqaalaha tusaale ahaan iyadoo loo sii marayo waaxda shaqaalaha.

Waa in shaqaale kasta loo suurageliyaa ugu yaaraan saddex maalinta oo aqoonkororsi ah sannadki.

Marka uu shaqaaluhu daalo ama uu shil ku dhaco, waa in la raadiyo habab firfircoon oo shaqaalaha ka taagerayaa in uu shaqada sii wato. Marka ay dhibaato ka jirto awoodda shaqada, waa in la suurageliyo tijaabo shaqo, shaqo beddel ah iyo in xoogga la saaro helitaanka shaqo ku habboon.

Waxaan qawlqaadnay, in aan degmo kasta iyo soone nololmaalmeed kasta ku horumarino isticmaalka faa'iidooyinka xiriirka shaqada iyo habraacyo abaalmarineed oo kala duwan oo taageeraya nololwanaagga shaqada.

Degmooyinka iyo soonayaasha nololwanaaggu uma xilsaari karaan cid kale waajibaadyadooda shaqo-bixiye ahaaneed, waa in marka lagu jiro sidoo kale wax soo iibsashada iyo shirkadahoodaba ay u hoggaansamaan siyaasadda shaqo-bixiyaha ee wanaaagsan.

## Waxaan ku dadaalaynaa fursadaha hiwaayadaha dhaqanka xoogga ayaa la saarayaa

Waa in degmooyinka dhexdooda lagu taageero jimicsi maalmeedka iyo lagu dadaalo helitaank iyo qiimo jabnaanta fursadaha jimicsiga, waana in sidoo kale la xaqiijiyo, in naadiyada iyo hawlwadeennada kale ee jimicso heystaan awoodo ay waxqabadkooda ku qabanqaabiyaan.

Waa in la taageero fursadaha hiwaayadda ee carruurta qoysaska dakhliga yar soo galo, si cunug kasta uu fursad ugu helo ugu yaraan hal hiwaayad oo joogto ah. Hadafkeennu waa, in cunug iyo da'yar kasta uu fursad u helo hal hiwaayad oo lacag la'aan ah inta uu ku jiro maalin-dugsiyeedka.

Qof kasta waa in uu heystaa fursad lagu dhegeyso iyo in uu saamayn ku yeesho gaarista go'aanka quseeya noloshaa iyo deegaanka uu degganyahay.

Waa degmooyinka dhexdooda lagula dadaalo nolosha dhaqanka iyo fursadaha waxqabadka, inkastoo ay xukuumadda dalku si xooggan u yaraynayso maalgelinta dhaqanka.

Waa in degmo kasta laga sameeyo barnaamij waxqabadka oo ay ku jiraan waxqabadyo la taaban karo oo lagu yaraynayo kelinnimada.

## Degmooyin ammaan ah oo shaqaynaya

Deegaanka xaafadeed, qayb magaalo iyo xaafad kasta waa in ay noqotaa mid meel lagu nolaado oo wanaagsan ammaana ah.
Waa in degmooyinka dhexdooda looga hortagaa kala soocmidda xaafadaha la degganyahay iyadoo la kaashanayo naqshadaynta, iskuxirka gaadiidka iyo adeegyada iyo in xoogga la saaro soosaarista guryo kiradoodu macquulka tahay. Waa in xaafadaha lagu horumaritaa wanaajinta adeegyada. Ma ahan in degmooyinka dhexdooda lagu dedejiyo kala soocmidda u

dhexeysa dugsiga iyadoo loo sii marayo arday u qaadashada ku salaysan soonayaasha iyo doorashada dugsiga. Waa dugsiyada loo taageero qaab baahida waafaqsan.

Waxaan u aragtaa, in qof kasta oo shaqeeya uu helo fursad uu si wacan ugu degganaado magaalooyinka waaweyn. Magaalooyinku waa in ay xoogga saaraan soo saarista guriga deegaan ah oo qiimo macquula ah waana in ay hirgelinayaan barnaamijyada maalgelinta guryaha, xilli ay xukuumaddi joojinayso taageerada xukuumadda ee soo saarista guryahay isalamarkaa ay dhimayso kaalmada hoyga. Waa in adeegyada guryaha ee degmada fiiro loogu yeesho dhaqan-dhaqaalaha carruurta, dhallinyarada iyo qoysaska ku jira kaalinta liidata.

Waa in hiigsi ahaan loo dejiyo, in Finland laga baabi'iyo guriga la'aanta ugu dambeyn sannadka 2030.

Waa degmooyinka xoogga lagu saaro dayactirka waddooyinka, nalalka iyo xalalka gaadiidka ee ammaanka ah. Waa in sidoo kale qorshaha magaalada, siyaasadda guryaha deegaanka iyo adeegyo shaqaynaya lagu xoojiyo ammaanka nololmaalmeedka.

Waa degmooyinka lagula dadaalaa iskuxirka gaadiidka ee ballaaran islamarkaana qiimihiisu macquul yahay, kuwaas oo sidoo kale xoojinaya doorka wax ka qabashada cimilada ee degmooyinka. Xaafada deegaanka waa in loo qorsheeyaa qaab ah, in adeegyada, hiwaayadaha iyo goobaha shaqooyinka lagu tegi karo gaadiidka dadweynaha iyo gaadiidka fudud. Degmo kasta waa in lagu dejiyo qorshaha cimilada.

Waa in sida hadda si ka adag wax looga qabto waxyeellada ay sababaan baaskiilada lugta tuurka ee korontada ku shaqeeya waana isticmaalkooda la dejiyo sharci gaar ahaan marka ay lagu isticmaalayo bartamaha magaalooyinka, tusaale ahaan iyadoo loo samaynayo goobo la dhigayo oo loo calaamadeeyay.

Baahida ambalaaska iyo ciidanka dabadamisku kuma xirna goob. Sidaas darteed, waa in Finland oo dhan lagula dadaalaa heerka adeegga iyo shuruudaha waxqabadka ee shaqada badbaadinta.

**Read the full election program of the SDP**